# Su'aalaha Guud ee ku Saabsan Isbeddelka Saacadaha Gudaha Guriga

Oregon Department of Human Services
OFFICE OF DEVELOPMENTAL DISABILITIES SERVICES

**Su'aalaha iyo jawaabaha ku saabsan adeegsiga Qiimaynta Baahiyaha Oregon (ONA) iyo kooxaha adeegga si loo go'aamiyo taageerada gudaha guriga lagu bixiyo**


## Waa maxay saacadaha gudaha guriga?

Saacadaha gudaha guriga waa tirada saacadaha bishii ee adeeg bixiyaha la siin karo si uu kuugu caawiyo guriga dhexdiisa. Waxaa go'aaminaya kooxda adeegga aad ku jirto.

## Waa maxay kooxaha adeeggu?

Kooxaha adeeggu waa kooxo dad ah oo leh baahiyo taageero oo isku mid ah. Qiimaynta Baahidaada Oregon (ONA) waxay kugu aaddisaa koox adeeg, iyadoo lagu salaynayo da'daada iyo xaddiga taageerada aad u baahan karto. Koox kasta oo adeeg ayaa leh saacado kala duwan oo aad go'aansan karto sida aad ugu isticmaali lahayd taageero ahaan.

## Sidee baan ugu isticmaalaa kooxaha adeegga qorshaheyga?




## Waa maxay sababta waxyaaluhu ay isu beddelayaan?

Waxaan u wareegaynaa inaan u isticmaalno hal qalab oo qiimeyneed oo loogu talagalay dhammaan adeegyada. Qalabkaasi waa Qiimaynta Baahiyaha Oregon (ONA). Waxaan rabnay inaan sii wanaajinno habka qiimeynta oo aan ka dhigno mid qof walba u cadaaladfala, si qof walba baahidiisa loogu daboolo si siman. Waxaan waydiinay dad kala duwan oo isticmaalay qalabkii hore sida aan u sii wanaajin karno. Waxaan la hadalnay khubaro dibadda ah, kuwa iskood u doodo iyo la-hawlgalayaasha bulshada. Si wada jir ah ayaan ula nimid ONA.

ONA waa hal qalab oo laga isticmaalo dhammaan Oregon. Waxaa loo adeegsadaa dhammaan noocyada adeegyada ay dadku helaan. ONA waxay diiradda saartaa xoogga qofka, xulashada, aayo-ka-tashiga, iyo qorsheynta nolosha oo isku dhan. Waxay hubisaa in baahida qof walba loo qiimeeyay si cadaalad ah, si laguugu

meeleeyo kooxda adeegga ee sida ugu fiican u buuxinaysa baahiyahaaga.

**Sidee buu isbeddelkani ii saamayn doonaa?**

Kooxaha adeeggu waxay ku meelayn doonaan ilaa kala badh dadka koox hesha saacado ka badan inta ay hadda haystaan. Badhka kale waxa lagu meelayn doonaa koox hesha saacado ka yar inta ay haddda haystaan. Isbeddelkani waxa uu dhacayaa 2024 iyo 2025. Dadka saacadaha yar yeelan doona, ma jiri doonto wax saamayn ah ilaa 2025 ugu horrayntii.

**Goorma ayuu isbeddelkani dhacayaa?**

Laga bilaabo Janaayo 1, 2024, saacadaha kala duwan ee kooxdaada adeega diyaar bay noqon doona. Hasa yeeshee, waxaan dadka siinaa waqti ay ugu kala gudbaan qaybaha saacadaha kooxaha adeegga. Marka aad la kulanto si aad u samaysato qorshahaaga cusub ee 2024, kooxdaada qorshaynta ayaa kaa caawin karta in ay ku tusaan nidaamkan. Waxaa laga yaabaa inaad horeba tan ugala shaqaynaysay kooxdaada qorshaynta ama aadan bilaabin ilaa dabayaaqada 2024. Waxaan rabnaa in qof kastaa ogaado in qofna saacadihiisa aynan hoos u dhacayn 2024.

**Saacadaheygu kor ma u kordhi karaan 2024?**

Waa laga yaabaa. Haddii Qiimaynta Baahiyaha Oregon (ONA) ay kugu aaddiso koox adeegeed leh saacado ka badan taageerooyinka aad hadda haysato, markaas waxaad heli doontaa saacado dheeri ah

oo aad ku isticmaasho Qorshahaaga Taageerada Shakhsiyeed (ISP) ee 2024 haddii aad u baahan tahay.

**Saacadahayga ma la dhimayaa marka aan helo ISP-ga 2024?**

Maya. Haddii Qiimaynta Baahiyaha Oregon (ONA) ay ku siiso saacado ka yar intii aad horay u haysatay, waxaad sii wadaysaa isticmaalka saacado la mid ah kuwaagii hore.

**Goorma ayaa saacadahayga la dhimayaa?**

Muddo ka dib Maarso 2025, haddii ONA-gaagu kugu aadiyo saacado ka yar inta aad hadda haysato, waxaad heli doontaa ogeysiis ah in saacadahaagu hoos u dhici doono. Waxaad heli doontaa macluumaad badan oo dheeraad ah oo ku saabsan isbeddelkan ka hor inta uusan dhicin.

**Maxaa la iiga baahan yahay inaan sameeyo?**

Lagaagama baahna inaad wax sameyso. Tani waa wargelin keliya.

**Sidee baan ku ogaan karaa inta saacadood ee aan haysto?**

ODDS ayaa warqad kuugu soo dirtay boostada Juun 2023. Warqaddu waxay kuu sheegtay kooxdaada adeegga iyo inta saacadood ee aad haysato maadaama aad qayb ka tahay kooxdaas. Haddii aadan haysan warqadda, ama baahiyahaaga taageerada ay isbeddelaan, waxaad weydiin kartaa isku-duwaha adeegyadaada ama wakiilkaaga gaarka ah. Waxay kuu sheegi karaan.

**Sidee baan ku ogaan karaa kooxda adeegga aan ku jiro?**

ODDS ayaa warqad kuugu soo dirtay boostada Juun 2023. Warqaddu waxay kuu sheegaysaa kooxdaada adeegga. Waxay kaloo ka hadlaysaa isbeddelada 2024 ee saacadaha gudaha guriga. Isku duwaha adeegyadaada ama wakiilka gaarka ah ayaa sidoo kale ogaan doona kooxda adeega aad ku jirto.

**Maxaa dhacaya haddii aanan jeclaysan waayo kooxdayda adeegga? Ama ay ila noqoto inay khalad tahay?**

Waxaad kala hadli kartaa isku-duwaha adeegyadaada ama wakiilkaaga gaarka ah sida Qiimaynta Baahiyaha Oregon (ONA) loo qiimeeyay. Waxaad waydiisan kartaa ONA cusub. Isku duwaha adeegyadaada ama wakiilka gaarka ah ayaa sidoo kale kaa caawin kara inaad cabasho u gudbiso Barnaamijkaaga Naafanimada Koriinka Bulshada (CDDP) ama dalaalnimada, ama ODDS.

**Maxaa dhacaya haddii aan u maleeyo inaan u baahanahay saacado badan oo taageero ah?**

La hadal isku-duwaha adeegyadaada ama wakiilkaaga gaarka ah. Waxay codsan karaan saacado dheeraad ah iyada oo loo marayo nidaamka reebitaanka. Waxay u baahan doonaan inay muujiyaan inaanay baahidaada buuxin karin tirada saacadaha kooxdaada adeegu haysato.

**Maxaa dhacaya haddii baahiyahaydu isbeddelaan ka dib Qorshaha Taageerada Shaqsiga ee 2024 dib-u-cusboonaysiisyada? Saacadahaygu ma beddelmi karaan hadhow?**

Waxaa laga yaabaa in baahiyahaagu ay wax ka beddelmaan marar badan inta noloshaada ah. Taasi waa sababta aan dib-ugu-eegno Qiimaynta Baahiyaha Oregon (ONA) sannad kasta. Waxaanu rabnaa inaanu xaqiijinno inaad haysato taageerada aad u baahan tahay. ONA ka dib ayaa laguu sheegi doonaa haddii saacadahaagu kordhi doonaan, hoos u dhici doonaan, ama ay sidoodii ahaan doonaan.

**Adeegyadaydu iyo taageerayaashu miyay is beddelayaan?**

Maya. Isbeddeladu waxay ku saabsan yihiin **sida** tirada saacadaha taageerada loo xisaabiyay. **Noocyada adeegyada iyo taageerada aad hesho ma isbedeli doonaan ilaa aad rabto inaad bedesho maahane.**

**Miyaan sii hasyan karaa isla bixiyahayga?**

Haa. Weli waad dooran kartaa adeeg bixiyayaashaada. Isticmaalka kooxaha adeega taas waxba kama bedesho.

---

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad balaaran, farta indhoolaha, ama qaabka aad doorbidideysid. Kala xiriir Xafiiska Adeegyada Naafooyinka Korriinka ee Oregon lambarka 503-945-5811. Waxaan ka aqbalnaa wicitaanada dhammaan noocyada adeegga gudbinta ee loogu talagalay dadka Dhagoolaha ah, kuwa Dhagaha iyo Indhaha la', kuwa Dhagaha Culus ama leh naafo xagga hadalka ah. Wixii

warbixin dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeega qadka booqo oregonrelay.com ama fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.

(La cusbooneysiiyey 1/2024)